SOMALISKA

Barnaamijka tallaalka ee iswiidhishka

KA TALLAALISTA JOONIS CADKA EE HABLAHA HPV

1-da Janaayo1, 2010 carruurta waxaa la baraya barnaamij talaal oo cusub. Tallaalku wuxuu ka ilaalinayaa marinka taranka gabdhaha cudur laga yaabo inuu sababo kansarka, waxaana la tallaalin dhammaan hablaha dhashay bartamihii 1999 ama wixii ka dambeeyey. Hablaha waxaa talaalaya kalkaliyayaasha caafimaadka ee jooga dugsiyada ay dhigtaan markay gaaraan fasalada 5-aad ama 6-aad.

Macluumaadka waalidka

Tallaalka cusubi wuxuu ka ilaalinayaa agagaarka marinka dhalmada cudurka kansarka qiyaas ahaan boqolkiiba 70. Sidoo kale , waxaa dhici kara inuu qofku ku dhici kansar si kastoo loo tallaalo. Sidaas daraadeed, waxaa muhiim ah in lagu kordhiyo tallaalka baaritaanka caafimaadka marinka dhalmada si joogta ah in loo siiyo tallaal noloshooda dambe. Hablaha lagu tallaalo dhalinyarinimada oo mara baaritaanka caafimaadka marink dhalmada markay waynaadaan xoog ayuu jirkooda iskaga ilaaliyaa kansarka ku dhaca marinka dhalmada.

Ka hor intanad go'aan gaarin waalid ahaan in ilmhaaga ay haboon tahay in la tallaalo, waxaa laga yaabaa inaad is-waydiiso su'aalaa. Sidee buu tallaalku u difaacayaa kansarka? Sidee baa tallaalka loo qaadanayaa? Halkan waxaad ka heli doontaa jawaabaha laga bixiyo su'aalaha guud.

Sidee buu tallaalku u difaaci karaa kansarka?

Cudur dhaliyaha kansarka ku dhaca marinka dhalmada waxaa lagu magacaabaa cudur dhaliyaha ku dhaca aadamaha ee papilloma (HPV). Cudur dhaliyuhu wuxuu ku faafaa galmada, oo hablaha badankoodu waxay khatar ugu sugan yihiin cudur dhaliyahan waqti un noloshooda. Xanuunku inta badan lama ogaado oo badanaa isagaa is-kaga bogsada.

Qayb yar oo kamida ah dadka xanuunka qaaday ayaa ka cabta muddaduu xanuunku socdo ee dhawrka sannadood qaata. Tani waxay u horseedaa khatarta unnugyada ku yaala marinka dhalmada dhexdiisa oo isbedala. Haddii unnugyada aan caadi ahayn la oggaadoo oo isla waqtigaaba laga saaro, waxaa laga yaabaa inay keenaan kansar.

Waxaa tira ahaanba jira boqolaal ku dhawaad noocyo cudur dhaliyayaala, oo ugu dhawaan 14 ka mida ayaa sababi kara kansarka. Tallaalka waxaa looga dan leeyahay laba nooc oo cudur dhaliyayaala kuwaasoo sababa xaaladaha xanuunada badankooda. Haddaba si arintan wax looga qabto, tallaalka ayaa kaa difaacaya ugu dhawaan boqolkiiba 70 dhammaan kansarada ku dhaca marinka dhalmada.

Tallaalku wuxuu bixin karaa oo kaliya difaacan kahor inta aanad xanuunka qaadin. Sidaas daraadeed, waxaa muhiim ah in tallaalka la qaato kahor, ama sida ugu suurtogalsan kadib, kulanka koowaad ee galmada.

Tallaalka iyo tijaabooyinka baaritaanada caafimaadka ee bixiya difaaca dheeraadka ee lagaga hortagayo kansarka ku dhaca marinka dhalmada

Waxaa muddo dhaweydba jirtay hab aad u shaqeeyey oo ka difaacaya qofka kansarka ku dhaca marinka dhalmada, way mahadsan yihiin qolada barnaamijka baaritaanka caafimaad ee marinka dhalmada ee Swiidhan. Barnaamijkan, dhammaan haweenka da'doodu u dhaxayso 23 iyo 60 ayaa la siiyaa baaritaanka caafimaada ee joogtada ah ee marinka dhalmada. Baaritaanka wuu fudud yahay oo xanuun ma leh. Ujeeddadu waa si daaha looga rogo unnugyadaan caadiga ahayn ee ku yaal marinka dhalmada kahor inta aanay qaadin kansar. Barnaamijkaan horumar fiican ayaa laga gaarey ilaa iyo intii la bilaabey 1960kii, si wayn ayuu hoos ugu dhigay haweenka u dhinta cudurka kansarka makaanka ku dhaca.

Waxaa muhiim ah in hablaha la tallaalay ay sidoo kale kasoo qaybgalaan baaritaanka xanuunada ku dhaca marinka dhalmada markay mudda kale loo qabto, maadaama aanay lahayn difaac gaaraya qiyaas ahaan boqolkiiba 30 ee kansarka ku dhaca marinka dhalmada.

Hablaha qaata tallaalka kana qayb gala baaritaanka xanuunada ku dhaca marinka dhalmada noloshooda intay jiraan si xooga ayaa jirkoodu iskaga difaacayaa cudurkaan. Haddii mustaqbalka laysla helo labadan arimood waxaa lagu qiyaasay inay badbaadiso nolosha haween aad u tiro badan oo ku nool waddanka Swiidhan sannad kasta.

Sideebaa tallaalka loo qaataa?

Tallaalka waxaa bixiya kalkaliyayaasha caafimaadka ee dugsiyada. Waxaa lagu mudaa tallaalka muruqa cudduda sare. Tallaalka waxtar fiican wuxuu yeelan markii la dhammaysto saddex tallaal, waana inay u kala dhexeeyaan muddo shan ilaa toddoba bilood gudahood.

Waa maxay waxyeelooyinka suurtogalka ah ee tallaalku leeyahya?

Hablaha badankood kuma aha waayoarag waxyeelooyinka ka yimaada tallaalka. Waxyeelooyinka dhaca qaar ayaa aad loo yaqaan. Tusaale ahaan, meesha laga tallaalay qofka ayaa casaata, xanuunta ama hurgunta. Qaar baa waxaa laga yaabaa inay la kulmaan calaamadaha la xiriira sida calool xanuunka, yaqyaqsi, matag, shuban iyo madax xanuun, muruq xanuun iyo tamar daro. Waxyeelooyinka ee mar-mar dhaca waxaa ka mida wareer, cuno xanuun iyo haragga jirka oo adkaada ama kabuubyo ku timaada agagaarka meesha la tallaalay.

Xaqiiqda ku saabsan kansarka ku dhaca marinka dhalmada

Da`da dumarka Swiidhishka ee ka cawda kansarka ku dhaca marinka dhalmadu waxay u badan tahay 54 jir. Qaar badan oo ka mida iyaga waxay qaadeen HPV kahor markay ahayd da'doodu 20 jir. Cudur dhaliyaha xanuunku wuxuu soo socday sannado aad u tiro badan, oo kamadanbaystiina sababay in qaab dhismeedka unnugyada uu ka dhigo qaar aan caadi ahayn. Waqti dheer, isbadaladan ayaa sababay kansarka.

Kansarka ku dhaca makaanka waana cudur halisa. Sannad kasta, ugu dhawaan 250,000 dumara oo ku kala firirsan adduunka ayaa u dhinta cudurka.

Sweden guddaheeda, ugu dhawaan 450 dumara ayaa ka cawda kansarka ku dhaca marinka dhalmada sannad kasta oo ugu dhawaan 150 ka mida iyaga. Tirakoobka xaaladaha halista ah ee kansarka ku dhaca marinka dhalmada ayaa muujinaya siday faa'ido u leedahay in si joogta ah loo yimaado baaritaanka caafimaadka. Tobankii dumaraba sideed kamida oo ah kuwa qaada kansarka halista ah ee ku dhaca marinka dhalmada ayaa ku guul daraystay inay ka soo qayb galaan baaritaanadan, ama kuwa aan ka soo qayb gelin weligood baaritaan.

Su'aalaha caadiga ah

Hablaha laga tallaalay kansarka ku dhaca marinka dhalmada miyuu gabi ahaanteedba ka difaacaya cudurka?

Maya, tallaalku wuxuu ka difaacayaa qiyaas ahaan boqolkiib todobaatan (70 %) dhammaan kansarka ku dhaca marinka dhalmada.

Haddii hadda baaritaanka caafimaadka ee marinka dhalmadu uu noqday tallaalka aan loo baahnayn miyuu jiraa tallaal loo qaato kansarka ku dhaca marinka dhalamda?

Run ahaantii, inkasto hablaha la tallaalay ay ka maqan yahay difaaca qiyaas ahaan boqolkiib sodon (30 %) ee dhammaan kansarka ku dhaca marinka dhalmada. Sidaasi darteed, waxaa muhiim ah in dadka la tallaalay sidoo kale yimaadan baaritaanda caafimaadka kuwaasoo la siiyo dhammaan haweenka kadib marka ay gaaraan 23 sano.

Tallaalku malagama maarmaan baa, inay hadda jirto hab lagu ogaado unnnugyada aan caadiga ahayn kahor inta aanay qaadin kansarka ku dhaca marinka dhalmada?

Daraasad ayaa muujisay in isla helitaanka tallaalka iyo baaritaanka caafimaadka dhalmada uu sii kordhiyo difaaca ka dhanka ah cudurada, lagu badbaadinkara nolol dumar tiro badan.

Ma loo baahanayaa in lays tallaalo marar kale inta qofku uu nool yahay?

Ilaa hadda la ma ogga haddii hablaha la tallaalay in dib loo cusboonaysiiyo difaacooga. Sidaas daraadeed, Guddiga Caafimaadka Qaranaka iyo Samafalka ayaa si aad ula socon doona daraasada socota ee tallaalka, si loo xaqiijiyo intay leeg tahay inta ay socon doonto.

Waa maxay sababta loo siinayo tallaalka HPV hablaha oo kaliya?

Maadaama ay hablaha oo kaliyii ay ka cawdaan kansarka ku dhaca marinka dhalmada, daraasad ayaa ilaa hadda xoogga saartay waxyeelada ay leedahay tallaalka habluhu. Cilmi baadhistu waa mid socota si daraasad loogu sameeyo intuu gaaro heerka tallaalk ee iyana wiilasha ka difaaci karta noocyada kale ee kansarka.

Miyaad taqaanaa intaas wax dhaafsiisan?

Macluumad intaas dhaafsiisan, fadlan kala xiriir adeegga caafimaadka dugsiyada.

MUHIIM!

Kahor tallaalka – Fadlan na soo ogaysii haddii uu ilmahaagu qabo xasaasiyad kasta ama uu horeba u qabay diiditaan uu jidhkiisu diidan yahay talaaladii hore ee uu soo qaatay.

Tallaalka kadib – La xidhiidh adeegga caafimaadka dugsiyada haddii aad oggaato wax aan caadi ahayn oo ku yimid ilmahaaga tallaalka kadib.

Socialstyrelsen
APRIL 2011